

— 879 —

Qodobka 399aad

Wakiilashada fulinta gadidda

Haddii laga helo xoolaha la qabtay qaarkood meel Maxkamad kale awood u leedahay waxaa u bannaan Garsooraha in uu amro marka uu soo saarayo go'aanka gadidda in gadidda qaarkaas naado ahaan loogu hor gadaa Maxkamadda meesha laga helo xoolaha.

Markaas kaaliyuhu wuxuu suurad ka mid ah go'aanka u dirayaa Maxkamadda loo wakiishay fulinta gadidda.

Qodobka 400aad

Dadka loo oggolyahay ka qayb ge'idda naadada

Waxaa u bannaan qofka aan deynqabaha ahayn in uu ka qaybgalo naadada haddii uu horey u dhiibey dammaanadda iyo kharajka gadidda la qiyaasay si waafaqsan go'aanka lagu soo xusay Qodobka 398.

Qofka ka qaybgelaya naadada waa in isaga ama wakiilkiisa gaarka ah soo bandhigaa waxa uu ku darayo naadada.

Haddii aan naadada lagu baarin qofka ka qaybgala waa loo celinayaa dammaanadda iyo kharajka la keenay kaddib markii la xiro naadada.

Qodobka 401aad

Habka Gadidda Xaraashka ah

Gadidda Xaraashka ah waxaa lagu samaynayaa Garsooraha hor-tiisa waxaana lagu qabanayaa fadhi furan oo ka dhaca qolka dacwada-ha.

Bandhiggu qiimo ma laha haddii uu ka badnayn sicirka saldhig-ga ah ama bandhig hore, sida lagu sheegay shuruudaha gadidda.

Bandhig kasta kaadib, Garsooruhu wuxuu samaynayaa asagoo u dhexeysiinaya hal daqiiqo, saddex yeeris dadka ka qayb gelaaya gadidda si ay wax ugu daraan bandhigga. Marka la soo dhaafo daqiiqada yeoridda ugu dambaysa ayadoo aan la samayn bandhig ka badan, maguurtada waxaa lagu baarinayaa ninka sameeyey bandhigga.

Bandhig kasta oo lacageed wuxuu noqonayaa wax kama jiraan, haddii la helo mid ka badan xataa haddii uu yahay kan dambe mid baadil ah.

701

— 880 —

Qodobka 402aad

Caddeynta degmada ama woorashada Degmada
ee qofka wax lagu baariyey

Waxaa waajib ku ah qofka lagu baariyey inuu caddeeyo degmadiisa ama meesha uu u doorto degmo ay ku taalo Maxkamada fulineysa gaacidda.

Haddii taasi la waayo, gaarsiinta iyo ogeysiinta waxaa loo dhigayaa xafiiska kaaliyaha.

Qodobka 403aad

Bandhigga ka dambeeya Xaraashka

Waa bannaan tahay haddana in la sameeyo bandhigyo gadashada ah toban maalmood dhexdood, laakin wax ka soo qaad ma laha haddii uusan sicirka la soo bandhigay ka hadnayn 20% lacagtii lagu baariyey

Bandhigaha waxaa waajib ku ah inuu keeno xafiiska Kaaliyaha caddeyn koobeysa tilmaanta sicirka, inuu bixiyo dammaanad aan ka yaraan toban meelood meel oo ka mid ah sicirka la soo bandhigay iyo inuu dhigo mablaq qiyaas ah oo kharajka gadiida oo uu xaddidaayo Kaaliyaha.

Qofka ku meel gaar ahaan wax lagu baariyey sida waafaqsan qodobka 401 waxaa lagu dabbaqayaa axkaanta qaybta ugu dambeysa ee isla qodobkaas.

Qodobka 404aad

Xaraashka Cusub

Kaddib markii ay dhanmaato muddada loo gooyey in lagu keeno bandhiga badan ee lagu caddeeyey qodobka hore Garsooruhu wuxuu amar ku qabanayaa fadhi lagu sameynayo xaraashka cusub oo lagu billaabayo sicirka saldhigga ah ee ka yimid bandhigga ugu hadan.

Kaaliyuhu wuxuu go'aanka ku faafinayaa qaababka faafinta ee lagu sheegay qodobka 397.

Xaraashka waxaa lagu samaynayaa qaababka lagu sheegay qodobka 401 iyo go'aanka baarinta ugu weyn sheegaya waa kama dambeys.

— 881 —

Qodobka 405aad

Bixinta Sicirka

waxaa ku waajib ah qofka lagu baariyey xaraashka in uu dhiibo sicirka iyadoo laga reebayo dammaanaddii horey uu u bixiyey, kuna dhiibo muddada iyo habka lagu sheegay go'aankii farayey amarka gadidda sida waafaqsan qodobka 398.

Haddii maguurtada lagu baariyo deynlaha rahanta rasmiga ah leh ama qof loo idmay in uu ku qaato deyn leh dammaanadda rahmi rasmiya ah waxaa u bannaan Garsooraha in uu amar ku xaddido dhiibista baaqiga sicirka.

Qodobka 406aad

Wareejinta Xoolaha la gaday

Garsooraha waxaa waajib ku ah in uu soo saaro kaddib markii sicirka la dhiibo amar loogu wareejinayo xoolaha la gaday qofka lagu baariyey isagoo ku soo celinaya sifooyinkii lagu sheegay go'aanka farahayey gadidda, amarka ku bixiyey tirtiridda Diiwaangelinta qabashooyinka iyo rahaamadaha rasmiga ah haddii ayna tan dambe u laharayn xilal uu qaaday qofka wax lagu baariyey sida waafaqsan qaybta labaad ee qodobka hore.

Haddana waa in amarka laga helaa in deynqabaha iyo ilaaliyaha ay isaga baxaan maguurtada la gaday.

Amarkuna wuxuu leeyahay xoog ah in gadidda la geliyo Diiwaanka maguurtada iyo xoog fulitaan oo ah in laga baxo.

Qodobka 407aad

Oofin la'aanta sicirka qofka lagu baariyey

Haddii qofka xaraashka lagu baariyey uusan ku dhiibin sicirka muddada iyo qaabka loo xaddiday wuxuu Garsooruhu amar ku bixinayaa in uu dhacay iyo lumitaanka dammaanadda ganaax ahaan, wuxuuna qabanayaa fadhi kale oo uu ku ahegeysanayo dhinacyada sida waafaqsan qodobka 397.

Kaaliyaha wuxuu gaarsiitayaa amarkaas qofka xaraashka lagu baariyey sidoo kale wuxuu ku faafinayaa hababka faafinta ee lagu sheegay qodobka 397.

Xaraashka cusubna waxaa loo samaynayaa si waafaqsan qodobka 397 iyo wixii ka dambeeya.